

Xiriirka iyo Waxbarashada Galmada (RSE)

Macluumaadka dugsiyada, goobaha, waalidiinta iyo daryeelayaasha.

Waxbarashada Wales way isbedelaysaa. Macalimiinta iyo khubarada waxbarashada ee Wales oo dhan waxay ka wada shaqaynayeen sidii ay u samayn lahaayeen manhajka Wales

Waxaan u baahanahay inaan caawino dhammaan dhallinyaradeena si ay uga wanaagsanadaan dhammaan dhinacyada nolosha, si ay ugu koraan dad waaweyn oo caafimaad qaba, iyo shakhsiyaad isku kalsoon. Waxbarashadu waa inay dhiirigelisaa oo taageertaa dhalinyarada inay ixtiraamaan naftooda iyo kuwa kaleba, si ay u qiimeeyaan kala duwanaanshiyaha, oo ay siiyaan awood ay ku dhistaan xiriir caafimaad qaba, oo ixtiraam leh.

Manhajka cusub ee bilaabmaya Sebtembar 2022 waxa ku jiri doona xidhiidhka ku habboon korriinka iyo Waxbarashada Galmada (RSE).

Waa maxay RSE?

Dhallinyaradu waa inay xaq u yeeshaan inay galaan macluumaadka iyaga ka ilaalinaya waxyeellada. Tani waxaa ka mid ah barashada xiriirka caafimaadka qaba, ilaalinta badbaado leh, khadka tooska ah iyo kan togan, iyo ku kalsoonaanta inaad kor u qaaddo arrimaha dadka waaweyn ee mas'uulka ah.

RSE waxa loo qaabeeyey inay ilaaliso dhamaan caruurteena iyo dhalinyarada, inay ukaalmayso si ay u horumariyaan aqoonta, xirfadaha iyo dhaqamada ka caawin doona ilaalinta iyaga noloshooda oo dhan.

Tani waxay muhiim u tahay dhismaha bulsho la dhaqanta dadka kale oo leh faham iyo naxariis, wax kasta oo ay yihiin isir, dhaqaale bulsho, naafanimo jinsi dhedig ama labnimo



Waxa ku jira Xeerka RSE ?

Xeerka Xiriirka iyo Waxbarashada Galmada (RSE). wuxuu faahfaahin ka bixiyaa dugsiyada iyo dejinta waxa ay tahay in la baro iyo goorta. Waxaan ku dhiirigelinaynaa waalidiinta inay akhriyaan Xeerka RSE ee la daabacay kaasoo siinaya caddayn ku saabsan waxay carruurtoodu baran doonaan iyo goorta. **Mawduucyada isdhaafsigaa ah ee naqshadaynta manhajkaaga - Hwb (gov.wales)**



Si weyn ayaa loo taxaddaray si loo hubiyo in dhammaan wax-barashada gudaha RSE ay noqoto mid ku habboon korriinka, iyo macallimiinta, daneeyayaasha ah iyo xirfadlayaasha ku lugta leh horumarinteeda waxay hubiyeen in tani ay ka muuqato Xeerka dhexdiisa.

Qaybta Xiriirka iyo Galmada (RSE) ee qaab dhismeedka manhajka Wales waxa ka koobantahay:

- Xeerka RSE - Maxaa la bari doonaa iyo marxalada;
- Hanuuninta sharciga - Tani waxay taageertaa dugsiyada si ay u horumariyaan manhajkooda RSE.

Xiriirka Koriinka kuhaboon Iyo Waxbarashada Galmada (RSE)

Waxaa jira shuruudo sharci oo RSE ah si ay u noqoto mid ku haboon korriinka, oo ay ku jiraan agabka dugsiyadu u isticmaalaan hirgelinta RSE.

Mawduucyada sida badbaadada khadka tooska ah, ogolaanshaha iyo caafimaadka galmada dhamaantood waxay kujiraan xeerarka laakin marxaladaha koriinka kuhaboon si aanay ardaydu usoogaadhin waxyaalaha aan

kuhaboonayn dadooda iyo koriimadooda. Tusaale ahaan da'da yar, waxaa la bari doonaa Inay isula dhaqmaan si naxariis iyo bihinbihin leh. Intay carruurto korayaan, waxay heli doonaan faham mawduucyada sida badbaadada onlaynka, ogolaanshaha iyo caafimaadka galmada – kuwaas oo dhan waxaa loo maarayn doonaa si xasaasi ah.

Barashada RSE sidoo kale waxaa ku jiri doona aqoonsiga, fahamka iyo ka hadalka dhammaan noocyada takoorida, gacan ka hadalka, xadgudubka iyo dayaca iyo in ka raadsato taageero iyo talo arrimo badan oo kala duwan ilo lagu kalsoon yahay.

RSE waxa kale oo looga baahan yahay inay noqoto ujeedo, muhiim ah iyo jamac: macnaha dugsiyada iyo goobaha waa inay bixiyaan macluumaad dhab ah iyo su'aalaha qiyamka, aragtiyo kala duwan oo ku saabsan mawduuca la bixiyay, oo inta badan lagu qabto bulshada dhexdeeda.



Ka qayb qaadashada waalidiinta iyo daryeelayaasha

Tilmaanta sharcigu aad bay u caddahay taas waxaan filaynaa in dugsiyadu si dhow ula shaqeeyaan waalidiinta si ay u hubiyaan inay fahmaan waxa ay caruurtoodu baranayaan.

Dugsiyada iyo goobaha waa inay lahaadaan khadad cad Oo isgaarsiinta ah ee la xiriirta RSE waana in ay ku lug yeeshaan ardayda, waalidiinta, daryeelayaasha iyo bulshada kale oo leh barashada iyo baridda RSE.

Dugsiyadu waa inay si buuxda uga warqabaan waalidiinta iyo daryeelayaasha ee waxa la baranayo iyo sababta, oo leh fursad su'aalo iyo caddayn. Xeerka RSE wuxuu leeyahay la daabacay si loo siiyo waalidiinta iyo daryeelayaasha caddayn iyo hufnaan ku saabsan waxay carruurtoodu baran doonaan iyo goorma.




xidhiidhka muhiimka ah:

Tusaha Manhajka Waalidka iyo Daryeelaha

Xiriirka iyo Waxbarashada Galmada Hanuuninta sharciga iyo xeerka

Liiska RSE



Kiiska Barashada:

Dugsiga Hoose ee Blaenymaes, Swansea



Cilaaqaadka iyo Waxbarashada Galmada waxaa ka mid ah barashada cilaaqaad caafimaad qaba, naxariis, ilaalin, iyo ku kalsoonaanta in aad arrimaha kala hadasho dadka waaweyn ee mas’uulka ah.

Ardayda sanadka 1 ee Dugsiga Hoose ee Blaenymaes ee Swansea waxay barten cilaaqaad caafimaad qaba intii lagu jiray casharka fasalka ee Mashruuca Spectrum bishii Juun 2022. Casharka waxaa ku jiray barashada ku habboon korriinka mawduucyada sida oggolaanshaha, kala duwanaanta, iyo xidhiidhaha. Ardaydu waxay ka qaybqaateen waxqabadyo ay ka mid yihiin samaynta “maraq saaxiibtinimo”, tusaale ahaan, si ay u fahmaan sifooyinka ay leeyihiin saaxiibka wanaagsan.

Intii uu socday fadhiga, ku-xigeenka maamulaha Mrs. Amirat ayaa tiri: “Runtii waa muhiim inaan nahay ilaalinta wanaagga iyo barbaarinta ardayda si ay u noqdaan kuwo caafimaad qaba oo kalsooni kuleh shakhsiyaadkooda, waxaan qabaa manhajka RSE taas ayay isku dayaysaa. Way dhisanayaan saaxiibtinimada, waxay baranayaan sida loogu naxariisto dadka kale, waxayna dareemayaan uun qayb ka mid ah kooxda laakiin midba midka kale qiimaynayo kala duwanaanshaha iyo fahamka in taasi tahay HAYe, heerka da’da ku haboon.”



Waxaad halkan ka arki kartaa muuqaalka xaalada daraasad:

XIRIIRKA

